

Waa hababka, ee ma aha Waxa-ka-soo-baxa

Marka aad howlaha farshaxanka la sameyneyso caruurta, habka – sida wax u dhacayaan – ayaa badanaa ka muhiimsan waxa-ka-soo-baxa – sheeyga ugu dambeeya ee la helo.

Sahminta suuragalnimada

Habka waa u muhiim caruurta gaar ahaan laba-jirada (toddlers) iyo da'da dugsiga aan gelin (preschoolers) ee bilaabayaa in aay sahmiyaan agagaarkooda. Wax badan ayeey ka baran karaan dareenka rinjiga farahooda dhexdooda ah, sida loogu riixi karo warqadda dusheeda iyo sida midabada aay isugu qasmaan. Muhiim ma ahan in sawirka uu “qurxoonaado.” Marka ugu horeeya ee aay isku dayaan laga yaabee in aay noqdaan midabo isku dhafan oo maroon ah waana fiican tahay. Waxay ogaadeen waxyaabo fara badan oo ku saabsan midabada iyo dareenka sheeyga.

Xalal helidda

Howlaha farshaxanka marka aad ka fikirto habka in ka badan waxa-ka-soo-baxa, waxaad ku dhiirigelin doontaa caruurta in aay isku dayaan sheeyo cusub. Waxaad rabtaa in aad ogaato habab kala duwan oo aay rinjiga u mariyaan warqadda, sida sheeyo taabashadooda kala duwan tahay looga sameeyo marka la isku xiro, waxa dhaca marka aad isku daydo in aad baakadaha ukunta ka sameeyo buundo. Inta aay tan sameynayaan caruurta waxay kaloo helaan fursad aay ku hormariyaan xirfadahooda xalinta dhibaatooyinka. Ha isku dayaan in aay habkooda wax u sameeyaan, xitaa haddii aaysan mar walba noqon sidii la rabay. Wax walba oo aay sameeyaan ma ahan in qaboojiyaha lagu nabo.

Raacidda tusmo

Dhinaca kale, mararka qaar laga yaabee in aad go'aansato in aad culeyska saarto in la sameeyo farshaxan u eg sheey gaar ah. Koobiyeynta tusmada waa xirfad aad uga duwan marka aad maskaxdaada ka sameyneyso. Caruurta waaweyn laga yaabee in aay diyaar u yihiin in aay isku dayaan in aay raacaan tusaale, markii aay bartaan sida sheeyada iyo qalabka u shaqeeyaan ka dib. Xitaa waxaa dhici karta in aay ku raaxeystaan xujada, inkastoo aay mar walba tahay in aay jirto fursad hal-abuurnimo.

Ku-ciyaaridda sheeyada

Xitaa da'da aay sameeyaan sahmiinta hore ka dib, caruurta waxay u sii baahnaan doonaan fursado aay ku raaxeystaan habka, ayagoo aan ka fikireyn in waxa-ka-soo-baxa aay yihiin “qurux” ama “fiican” doonaan. Markii cadaadiskaas laga qaado caruurta waaweyn (iyo xitaa dadka waaweyn) weey ku raaxeysan karaan sheeyada iyo helidda waxyaabo cusub. Marka aad qorsheyneyso waayoaragnimooyin farshaxan, xusuuso in aad miisaanto raadinta sheeyga iyo in aad u ogolaato habka in uu socdo.

Qalabka Farshaxanka ee Aasaasiga ah

Waa kuwan qalabka farshaxanka aasaasiga ah qaarkood ee ku dhiirigelin doona caruurta in aay fikraddooda ku sheegaan farshaxan iyo sawir.

- maqas caruurta amaan u ah
- qori xabag ah, xabag cad ama cajiin
- qalmaan-qori midabyo leh oo weyn iyo kuwo xaj-caadi ah (oo dhaqmaya)
- qalmaan caadi ah oo midabo leh, qaar caarado kala duwan (oo dhaqmaya)
- qalin qori midab leh, jeeso
- rinji iyo buraash rinji
- warqadaha dhismaha, joornaal, warqad la nacay
- qoryaha jalaatada (popsicle)
- haraaga marooyinka iyo dunta laga sameeyo
- sanduuqyo maran, baakadaha caanaha iyo ukunta, duubka warqadaha musqusha
- haraaga warqadaha wax lagu duubo, ribbon
- Kaataalooiyada, wargeysyada, kaararka salaanta ee duqoobay

Rinjiyeynta dhaafsiisan buraashyada

Wax walba ayaa loo bedeli karaa aalad wax lagu rinjiyeyyo oo hal-abuurnimo iyo xiisad leh. Maskaxdaada u ogolow in aay si aan xad lahayn u fikirto.

- buraashyada (buraashyo yar-yar, buraashka lagu cadaydo, buraashyada rinjiga ee duqoobay, iwm)
- duubka rinjiga ee weyn (qoriga xaaqin duqoobay ku xir oo caruurta haku sameeyaan rinji ayagoo ku giraangirinaya meesha dadka maraan)
- faraha gacmaha iyo lugaha
- isbuunyada, Q-tips, kuwa indhaha wax lagula dhibciyo
- dhalooyinka la tuujiyo iyo kuwa la buufiyo
- buskutka kan lagu jaro, xaywaanka tooyada ah (wax ku daabac)
- baloogyo loox ah (wax ku xabagee si loogu sameeyo sheeyo taabasho kala duwan lagu dareemo)
- alaabta kushiinka (bataatiga kan lagu ridqo wuxuu sameeyaa hindise xiiso leh)
- fataatiir (ku giraangiri sanduuq warqad ku jirto)
- dhuunta wax lagu nuugo (rinji ku buufi warqadda dusheeda)
- gawaarida lagu ciyaaro (ku giraangiri rinji, ka dibana warqad ku dul kaxee)
- laamaha geedka pine-ka
- qeybo kaarbetka ah, gacmo-gashi midkood lumay (ku daabac)
- duubka warqadaha musqusha (warqad ku dul giraangiri; ku dheji dun ama sheeyo kale duubabka)
- rinji buufsama (ku dar dareere buufsama oo ku buufi warqad)
- dun, wool
- baraf (biyo badan ku qas rinjiga weelalka yogart dhexdiisa, ku rid qoriga jalaatada, oo baraf ka dhig)
- saladaha basasha ee shabaqa ah (ka buuxi kubado yaryar oo suuf/cudbi ah oo xoog isug xir, ku daabac markaas)

Waxaa qoray Betsy Mann

Oo kaalmo ka heshay Barb Stevenson, xanaano caruur oo guriga ah, Ottawa

Le processus, pas le produit

Quand vous faites des activités d'art et de bricolage avec les enfants, le **processus** — le déroulement de l'activité — est souvent beaucoup plus important que le **produit** — son résultat final.

Explorer des possibilités

Il convient d'adopter cette perspective en particulier vis-à-vis des enfants en bas âge, au moment de leur vie quand ils commencent à explorer le monde qui les entoure. À ce stade de leur développement, ils ont intérêt à apprendre la sensation de la peinture à doigts sur les mains, les différentes manières de l'appliquer sur le papier, les façons de mélanger les couleurs. Il n'est pas du tout important que leur tableau soit « beau ». Leurs premiers essais peuvent finir en mélange brunâtre de toutes les couleurs et c'est bien. Ils auront fait de grandes découvertes au sujet des couleurs et des textures.

Découvrir des solutions

Lorsque vous mettez l'accent sur le processus plutôt que sur le produit, vous encouragez les enfants à essayer librement de nouveaux matériaux de bricolage. Vous voulez qu'ils *découvrent* différentes façons de mettre de la peinture sur du papier, de faire coller ensemble différentes textures, de bâtir un pont avec des cartons à oeufs.

Fournitures de base pour le bricolage

Voici quelques fournitures de base qui inspireront les enfants à s'exprimer par le biais des bricolages :

- ciseaux à bouts ronds;
- bâtons de colle, colle blanche ou colle « maison »;
- crayons de cire lavables, de grande et de petite taille;
- marqueurs lavables, aux embouts de diverses formes;
- crayons à dessin de couleur, craie;
- peinture et des pinceaux;
- papier de bricolage, papier journal, papier rebut;
- bâtons de popsicle;
- retailles de tissu, bouts de laine;
- boîtes vides, cartons à lait, cartons à oeufs, tubes de papier de toilette;
- retailles de papier d'emballage, rubans;
- vieux catalogues, vieilles revues, vieilles cartes à souhaits.

La peinture au delà des pinceaux

Les objets qui peuvent servir à la peinture se retrouvent partout. Voici une liste qui nourrira votre imagination :

- petites brosses, brosses à dents, vieux pinceaux de peinture, marqueurs séchés;
- grands rouleaux de peinture (On les met sur un manche à balai et les enfants peignent le trottoir);
- doigts et orteils;
- éponges, coton tiges, compte-gouttes;
- emporte-pièce, animaux jouets, échantillons de tapis (pour faire des impressions);
- blocs en bois, bouts de bois (y coller des choses pour créer diverses textures);
- ustensiles de cuisine (les pilons à patates font des dessins intéressants);
- billes (les faire rouler dans une boîte doublée de papier);
- pailles (souffler la peinture sur le papier);
- autos jouets (les rouler dans la peinture et sur le papier);
- tubes de papier à toilette (rouler sur le papier; y coller de la ficelle ou d'autres textures);
- bulles (ajouter du liquide pour bulles à la peinture et souffler pour imprimer les bulles sur le papier);
- ficelle, laine, branches de pin;
- glaçons (mélanger de la peinture avec beaucoup d'eau dans de petits contenants, ajouter un bâton de bois comme poignée, congeler);
- bouteilles à vaporiser, bouteilles à désodorisant (enlever la bille d'une bouteille et la remplir de peinture diluée. Remettre la bille et rouler la peinture sur le papier);
- sacs à oignons (remplir de boules d'ouate et attacher, pour faire des impressions);
- mitaines dépareillées (pour faire des impressions).

Ce sont autant d'occasions de s'exercer leurs aptitudes de résolution des problèmes. Encouragez-les à faire les choses à leur manière, même si ça ne réussit pas toujours. Vous n'êtes pas obligé d'afficher tout ce qu'ils font sur la porte du frigo!

Suivre un modèle

Par contre, à d'autres moments, vous déciderez de mettre l'accent sur la fabrication d'un bricolage qui ressemble à un produit fini spécifique. Savoir copier un modèle est une habileté très différente de savoir créer à partir de son imagination. Les enfants plus âgés seront peut-être prêts à suivre un exemple, après qu'ils auront appris le mode d'emploi des matériaux et des outils. Il est fort possible qu'ils apprécient le défi, mais il faut encore laisser la place à la créativité personnelle.

Jouer avec des matériaux

N'oubliez jamais le plaisir du processus. Même les enfants plus âgés (et les adultes!) s'amuse à jouer avec des matériaux, à découvrir de nouveaux effets sans s'inquiéter de produire une grande oeuvre d'art. Quand vous planifiez des expériences artistiques, gardez à l'esprit l'objectif d'un équilibre entre la production d'un résultat prévu et la liberté d'expression selon l'inspiration du moment.

par Betsy Mann

avec l'aide de Barb Stevenson, éducatrice en services de garde, Ottawa